



Isku-Badbaadi-Goobtaada (Shelter-in-Place)

Haddii uu dhaco weerar la isticmaalayo waxyeele kiimiko ah, maamulku waxa uu dadka fari doonaa inay gabood ka raadsadaan meesha ay joogaan oo ay gufeeyaan guriga (isku-badbaadi goobtaada), ama isla markiiba qaxaan.



Gala gudaha.



Xidh dhammaan
daaqadaha iyo
albaabada.



Xidh hababka hawo keenista (kulaylinta
iyo hawo qaboojinta, iyo daboolada goobta
dabka).



Gala qolka ugu albaabo iyo daaqado yar oo
gufee qolka.



Jooga qolka ilaa maamulka ka sheegayo
inay ammaan tahay in dibadda loo baxo.

Sida la isugu badbaadiyo goobtaada

- Qoy tuwaalo ama shukumaano oo saar meelaha daloola ee ka hooseeya albaabada.
- Jar bac si aad u galisid dusha daaqadaha iyo meelaha hawadu ka soo gasho. Bacda ku adkee dhejiska “duct”.
- Dhejiska ku dheji wareegga albaabka.
- Daar raadyaha.
- Hawada dibadda ha u bixin ama ha ka tagin goobtaada aad gufeysay ilaa laguu sheego inaad sidaas yeeshid.

Xusuuso

- Haddii lagugu amro inaad baxdid ama qaxdid, isla markiiba taas samee oo si taxadir leh u raac fariimaha. Ha iska warweegin; garo meesha aad u socotid iyo sida loo tago.
- Hadafkaaga koowaad waa inuu ahaado inaad ka baxsatid soo-gaadhis kiimiko. Goobtaada badbaadsan oo aad ka baxdid si aad u badbaadisid ama u gargaartid dhibaneyaal waxay noqon kartaa go’ aan dhimasho leh.

- Marka ay jirto xaalad degdeg oo ah kiimiko, aad bay u yar tahay waxa tabaruce aan tababar haysan uu qaban karo si uu u gargaaro dhibaneyaal. Joog goobtaada badbaadsan ilaa maamulku go’amiyo inay ammaan tahay in laga baxo.
- Haddii aad dibadda joogtay ka hor inta aanad goob ka galin oo aad u maleynaysid inuu ku soo gaadhat waxyeele kiimiko ah, waxa jira dhawr wax oo aad sameyn kartid. Haddii aad joogtid goob gufeysan, iska saar ugu yaraan dharkaaga sare, ku rid boorsa balaastig ah, oo xidh boorsada. Haddii biyo la heli karo, is dhaq ama qaado qubeys sare joog ah oo qabow ilaa mid diiran (ma aha mid kulul), adiga oo isticmaalaya saabuun iyo biyo badan. Saabuunta ha galin indhahaaga, kaliya biyo badan. Haddii aad ka tagtid aaggaa, u sheeg ka-jawaabeyasha degdeggaa ama shaqaalahaa caafimaadka ee goobta aad gaadhid in laga yaabo inuu ku soo gaadhat waxyeele ah kiimiko. Ka-jawaabeyasha degdeggaa u sheeg boorsada xidhan si ay u diyaariyaan in si ammaan ah loo qaado ka dib degdeggaa.
- Haddii aad qabtid astaamo soo-gaadhis, isla markiiba wac 9-1-1 oo raac amaradoodaa.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-020
Somali